

### Imtaxaanka Sayniska iyo Cilmiga Bulshada ee Colorado Alternate (CoALT)

Qiimeynta waxay siisaa warbixin qiimo leh ardayda, waaladiinta iyo macalimiinta oo kusaabsan in ardaydu ay gaareen heerka fasalka laga rabo iyo heerarka udagsan maadada ayna kusocdaan wadadii qalin jabinta oo udiyaarsan qarniga 21 aad. Natiijooyinka qiimaynta waxaa loogu talagalay inay hal cadayn unoqdaan hormarka aqooneed ee cunugaaga.



#### MAXAY TAHAY QIIMAYNTAAN?

Imtaxaanka Sayniska iyo Cilmiga Bulshada ee CoAlt waa imaxaano heer caadiya llagu baxsho wuxuuna cabiraa hormarka ardaydu kasameeyaan Natiijooyinka Cadaynta Dheeraadka ah ee Heerarka Waxbarashada Colorado. Kani waa imtaxaan gobalka qasab ka ah lagana qaado ardayda qaba naafada dhanka fahanka oo wayn kuwaasoo aan awoodin inay kaqaybgalaan imtaxaanka CMAS, xataa marka caawimaad lasiiyo. Imtaxaanka Saymiska ee CoAlt waxaa laga qaadaa ardayda dhigta fasalada 5, 8 iyo 11. Imtaxaanka Cilmiga Bulshada ee CoAlt waxaa laga qaadaa ardayda dhigta fasalada 4 iyo 7 (tijaabooyin kudhisin kudhawaad 1/3 kaqaybgalka dugsiga).



#### XAGEE AYAA CUNUGAYGA IMTAXAANKA LOOGA QAADAYAA?

Cunugaaga waxaa imtaxaan laga qaadayaa bisha Abriil. Canugaada waxaa la imtaxaamayaa kaliya maalmaha qaarkood sida ku saleysan fasalka iyo maadada, ma ahan xiliga lagu gudo jiro qeybta oo dhan. Fadlan laxariir macalinka cunugaaga si aad uhesho xiliyada gaarka ah ee jadwalka imtaxaanka.



#### WAA MAXAY BUUNDOOYINKA CUNUGAYGU HELI DOONO?

Cunugaaga waxaa lasiinayaa buundo cabiran iyo heer muujinaaya dadaalkiisa aqooneed. Heerarka dadaalka aqoontu waxay muujinayaan fikradaha iyo xirfadaha laga doonaayo in ardaydu layimaadaan midkasta oo kamid ah heerarka. Afarka qaybood ee fasalada kaladuwan ee dadaalka aqoontu waa Bilowga, Hormarka, Soo kabashada iyo Barashada.

Cabirka buundada guud ee cunugaaga (tirada udhaxaysa 0 iyo 250) iyo heerka dadaalka (Barashada, Soo kabashada, Hormarka ama Bilowga) ayaa lasheegayaa. Aqoonsi iskudhahan ayaa lasiiyaa ardayda aan kajawaabin wax kamid ah su'aalaha imtaxaanka. Buundooyinka waxaa lagu shaacinayaa dugsiga xiliga dayrta.



#### SIDEE AYAA BUUNDOOYINKAAN LOO ADEEGSANAYAA?

Ujeedada rasmiga ah e barnaamijka imtaxaanku waa in lagoon'aansho heerka ardayda Colorado ee qaba naafada wayn ee dhanka fahanka ah kubuuxin karaan Natiijooyinka Cadaynta Dheeraadka ah ee Heerarka Waxbarashada Colorado ee maadooyinka Sayniska iyo Cilmiga Bulshada marka lagaaro dhamaadka heerka fasalka lagu imtaxaanaayo. Natiijooyinka CoAlt waxaa loogu talagalay in lagu baxsho hal cabir oo hormarka waxbarashada ardayga ah oo laxariirta Natiijooyinka Cadaynta Dheeraadka ah.



#### WARBIXIN DHEERAAD AH

Waxaan kugu dhiirigalinaynaa inaad kaqaybgasho waxbarashada cunugaaga. Fadlan haka daahin inaad laxariirto macalinka ardaygaaga si uu kuugu sheego qaababka aad kucaawin karto cunugaaga markuu guriga joogo iyo helitaanka caawimaado dhanka imtaxaanka ah.

Hadaad su'aalo iyo walaacyo kaqabto imtaxaanada, fadlan laxariir dugsiga cunugaaga si toos ah ama wac Adeegyada Deegnaaka Qoyska oo nambarkoodu yahay (720) 423-3054.